Foomka Lagu ansixiyay ee
OMB Lambarka Xakameynta. 0920-1303
Taariiqda Dhacitaanka: 12/31/2020

# [FOOMKA] KU DHAWAAQIDA SIDA WAAFAQSAN CIQAABTA BEENSHEEGIDA EE LOOGU TALLOGALAY XARUMAHA XAKAMEYNTA IYO KA HORTAGA CUDURKA EE KU MEELGAARKA HAKINTA KA SAARIDA SI LOOGA HORTAGO FAAFID DHEERAAD AH EE COVID-19

Ku dhawaaqida kireystayaasha, heshiis galayaasha, ama dagayaasha dhismaha deegaanka ee ku daboolan dalabka CDC oo si ku meel gaar ah u hakinayo ka guurinta (aanan ku jirin kala wareegida guriga deynta) si looga hortago faafid dheeraad ah oo COVID-19. Sida waafaqsan amarka CDC waa inaad siisaa koobiga ku dhawaaqidaan milkiilaha gurigaaga, milkiilaha dhismaha deegaanka halka aad ku nooshahay, ama qof kale oo leh xaquuqda lagaaga saarayo ama lagaaga bixinayo halka aad ku nooshahaya. Qof walboo oo qaangaar ah ee ku qoran heshiiska guriga, heshiiska kirada, ama heshiiska guriyeynta waxay dhameystiraan ku dhawaaqidaan. Illaa amarka CDC la kordhiyay, la badelo, ama la dhameeyo, amarka wuxuu kaa illaaliyaa inaan lagaa saarin ama lagaa bixin halka aad ku nooshahay oo illaa December 31, 2020. Waxaa weli lagaaga baahan yahay inaad bixisid kirada oo aad raacdid dhammaan xeerarka kale ee kiradaada iyo sharciyada meesha aad ku nooshahay. Weli waa lagaaga saari karaa sababaha aan ka aheyn bixin la'aanta kirada ama sameynta lacag bixinta guriga. Ku dhaaaqidaan waa dhaar marqaati ah, micnaheeda yahay in maxkamad lagu xukumi karo, xabsi aadid, ama ganaax bixisid haddii aad been sheegtid, marin habaabisid, ama badeshid warbixin muhiim.

Waxaan cadeynayaa sida ku saleysan ciqaabta beensheegida, sida waafaqsan 28 U.S.C. § 1746, in waxyaabaha kor lagu sheegay ay run iyo sax yihiin:

- Waxaan isticmaalay dadaalada ugu wanaagsan ee lagu helayo dhammaan caawinta dowlada la heli karo ee loogu tallogalay kirada ama guriyeynta;[1]
- Waxaan midkood filanayaa inaan kasbado wax ka badan $99,000 oo daqliga sannadlaha ee Jadwalka Sannadka 2020 (ama aanan ka badneyn $198,000 haddii xareynta soo celinrta cashuurta wadajirka ah), loogama baahneyn ku soo wargelinta daqli walba ee 2019 Adeega Daqliga Gudaha Mareykanka, ama la helay Lacag bixinta Saameynta Dhaqaalaha (hubinta kobcinta) sida waafaqsan Qeybta 2201 ee Xeerka CARES;
- Ma awoodo inaan bixiyo kiradeyda dhameystiran ama bixiyo lacag bixinta guriga oo dhameystiran sabab la xiriiro qasaaraha weyn ee daqliga guriga, qasaaraha saacadaha la magdhabi karo ee shaqada ama mushaarada, shaqo ka joojinta, ama qarashaadka[2] caafimaadka jeebka laga bixiyo ee aan caadiga aheyn;
- Waxaan isticmaalayaa dadaalada ugu wanaagsan oo aan ku bixiyo lacag bixinada qeyb ahaanta ee waqtiyeysan taas oo u dhow lacag bixinta dhameystiran sida xaaladaha shaqsiyaadka ay u ogolaan karto, tixgelinta qarashaadka kale ee aaan iqtiyaarka aheyn;

[1] "Caawinta dowlada ee la heli karo" waxaa loola jeedaa faa'idooyinka kirada dowlada iyo lacag bixinta guriyeynta ee loo heli karo shaqsiga ama xubinta walba ee qoyska.

[2] Qarashaadka caafimaadka "aan caadiga aheyn" waa qarash walba ee caafimaadka oo aan la celin karin sida inay dhaafto boqolkiiba 7.5% ee daqliga guud ee la saxay sannadka.

Culeyska wargelinta bulshada ee aruurinta warbixinta waaa lagu qiyaasay isku celicelis 5 daqiiqo jawaabtiiba, oo ay ku jiraan waqtiga dibka loo eegayo tilmaamaha, raadinta illaha xogta jirtay, usu keenista iyo joogteynta xogta loo baahanyahay, iyo dhameystirka iyo dib u eegida warbixin aruurinta. Hay'ada laga yaabo in ay sameynin ama kafaalo qaadin, iyo qofka lagama rabo in uu ka jawaabo warbixin aruurinta ilaa ay muujiso saxnaanta hadeer ee lambarka xakameynta OMB. Soo dir faalooyinka la xiriiro culeyskaan la qiyaasay ama dhinacyada kale ee warbixin aruurintaan, oo ay ku jiraan soo jeedinada yareynta culeyskaan ee Sarkaalka Xaqiijinta Wargelinada CDC/ATSDR; 1600 Clifton Road NE, MS D- 74, Atlanta, Georgia 30333; Fiiro gaar ah: OMB-PRA (0920-1303)

- Haddii layga saaro waxaan badanaa noqonayaa guri laawe, waxaan u baahanayaan inaan u guuro hoyga guri laawaha, ama waxaan u baahannahay inaan u guuro deegaan cusub oo ay dad kale wadaagaan ee ku nool meel dhow sababtoo ah ma lihi dooq kaloo guriyeyn la heli karo.[3]
- Waan fahamsannahay inay tahay inaan weli bixiyo kirada ama bixiyo lacag bixinta guriga, oo aan u hogaansamo waajibaadyada kale ee aan ku yeelan karo sida waafaqsan kireysigeyga, heshiiska guriga, ama heshiis la mid ah. Waxaa kaloon fahamsannahay in qidmooyinka, ciqaabaha, ama danaha aadan ku bixineyn kirada ama aadan bixineyn lacag bixinta guriga sida looga baahanyahay kireysigeyga, heshiiska guriga, ama heshiiska la midka ah weli waa lagu dalaci karaa ama laga aruurin karaa.
- Waxaa kaloon fahamsannahay in dhammaadka hakintaan ku meelgaarka ah oo ka saarida December 31, 2020, bixiyaha gurigeyga wuxuu ugu baahan karaa lacag bixinta si dhameystiran ama oo dhammaan lacag bixinada aan la sameyn ka hor iyo inta lagu jiro hakinta ku meel gaar ah iyo guuldarad lagu bixinayo waxay igu sababi kartaa ka saarid sida waafaqsan sharciyada gobolka iyo deegaanka.

Waan fahamsannahay in bayaano walboo been ama marin habaabin ah ama badelada ay sababi karto tallaabooyin dambiile ama rayid oo ganaaxyo, ciqaabo, waxyeelooyin, ama xabsiyeyn.

___________________________________________ ________________

Saxiixa Ku dhawaaqaha Taariiqda

[3] "Guriga la heli karo" waxaa loola jeedaa dhismo walboo deegaan ee la heli karo, aan la daganeyn, ama boos kale ee loogu tallogalay daganaansho oo guriyeynta xiliyeedka ama ku meelgaar ah, oo aanan ku xadgudbneyn heerarka faderaalka, gobolka, ama daganaanshaha oo taasi makuugu sababeyso kordhinta guud ee qarashka guriyeynta.

Culeyska wargelinta bulshada ee aruurinta warbixinta waaa lagu qiyaasay isku celicelis 5 daqiiqo jawaabtiiba, oo ay ku jiraan waqtiga dibka loo eegayo tilmaamaha, raadinta illaha xogta jirtay, usu keenista iyo joogteynta xogta loo baahanyahay, iyo dhameystirka iyo dib u eegida warbixin aruurinta. Hay'ada laga yaabo in ay sameynin ama kafaalo qaadin, iyo qofka lagama rabo in uu ka jawaabo warbixin aruurinta ilaa ay muujiso saxnaanta hadeer ee lambarka xakameynta OMB. Soo dir faalooyinka la xiriiro culeyskaan la qiyaasay ama dhinacyada kale ee warbixin aruurintaan, oo ay ku jiraan soo jeedinada yareynta culeyskaan ee Sarkaalka Xaqiijinta Wargelinada CDC/ATSDR; 1600 Clifton Road NE, MS D- 74, Atlanta, Georgia 30333; Fiiro gaar ah: OMB-PRA (0920-1303)